

Miisaaniyadda 2023: Sugidda mustaqbalka carruurta

Feb. 28, 2023

Miisaaniyada 2023 waxay ka dhigeysaa maalgashi taariikhi ah oo dhanka waxbarashada ah si ay ula mid noqoto isdiiwaan galinta sii kordheysa ee dugsiyada, si loo daboolo baahiyaha ardayda kala duwan, iyo in la kordhiyo kharashka.

Miisaaniyada 2023 waxay ku kordhisay miisaaniyada ay ku shaqaynayso wasaarada waxbarashada ku dhawaad \$2 bilyan doolar saddexda sano ee soo socota. Tani waxay taageeri doontaa shaqaaleysiinta ilaa 3,000 oo shaqaale waxbarasho ah, oo ay ku jiraan macalimiin, caawiyayaasha waxbarashada, darawalada baska iyo shaqaalaha taageerada dugsiya.

Sannad-dugsiyeedka 2023-24, Alberta waxa ay ku kharash garayn doontaa \$8.8 bilyan doolar waxbarashada ardayda fasallada Xannaanada ilaa Fasalka 12aad, oo u dhiganta \$44 milyan doolar maalin dugsiyeed kasta. Maalgelinta kobaca isdiiwaangelintu waa \$820 milyan doolar muddo saddex sano ah.

"Maalgelintani waxay wax ka qabanaysaa is-diiwaangelinta sii kordheysa, waxay caawineysaa baahida kala duwan ee ardayda waxayna caawineysaa dugsiyada inay la dagaalamaan sicir-bararka," ayay tiri Adriana LaGrange, Wasiirka Waxbarashada ee Xukuumadda Alberta.

Shaqaalaysiinta macalimiin badan iyo kaaliyeyaal ayaa kaa caawin doona dhimista tirada ardeyda fasalkiiba.

Miisaaniyadda 2023 waxa ku jira ku dhawaad \$1.5 bilyan doolar oo ah maalgelinta Taageerada Waxbarashada ee ardayda aadka u nugul ee Alberta. Tan waxa ku jira Ingiriisiga Luqad Labaad ahaan iyo caawinta ardayda qaxootiga iyo baahiyaha gaarka ah.

"Caruurteenu waa mustaqbalkeena iyo miisaaniyada 2023 waxay hubineysaa in ilmo kasta lagu taageero fasalka," ayuu yidhi Travis Toews, Wasiirka Maaliyadda ee Xukuumadda Alberta.

Xiriirka xogaha

[Alberta.ca/Budget](https://alberta.ca/Budget)

Wediimaha warbaahinta

Charlotte Taillon

charlotte.taillon@gov.ab.ca

780-932-5381

Xoghayaha Warfaafinta, Guddiga

Maaliyadda iyo Keydadka



War saxaafadeed

Maamulka dugsiga ayaa sidoo kale heli doona \$414 milyan doolar muddo saddex sano ah si loo siiyo arday badan oo uu gobolku bixiyo gaadiid dugsiyeedka.